



## King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

# GURYO LA AWOODI KARO IYO GURYO LA,AANTA

---

Miisaaniyada 2023-2024 waxay abuuri doontaa guryo la awoodi karo oo taageero leh, waxay ka ilaalin doontaa dadka inay noqdaan guryo la'aan, waxayna ka taageeri doontaa Regional Homelessness Authority (Maamulka Guryo la'aanta Gobolka) King County ee qaabilسان in si guul leh wax looga qabto dhibaatooyinka dadka kunool banaanka iyo hoyga . Maalgelinada Muhiimka ah waxaa kamid ah:

### Yareynta guryo/ Hoy La'aanta

- **Sii wadista Caafimaadka ayadoo loo marayo Maalgelinada Guriyeynta:** Maalgelinta hawlaho joogtada ah, dayactirka, iyo dayactirka socda ee 1,600 unug oo ah guryo taageero joogto ah bixiya oo ku yaala huteeladii hore ee gobolka.
- **Taageerida Hawlaho Guriyeynta:** Ilaa \$30 milyan oo lagu maalgelinaayo hawlaho, dayactirka, iyo adeegyada hadda jira iyo goobaha taageerada bixiya ee guriyeynta.
- **Furida Xarun Baxnaanin:** \$5.7 milyan oo lagu darayo xarun bixisa baxnaaninta xarunta hoyga SODO. Hawlgalada xarunta baxnaaninta waxa lagu maalgelin doonaa American Rescue Plan (Qorshaha Samata-bixinta Ameerikaanka).

### Maalgelinta Guryaha Qiimaha Jaban

- **Dhisida guryo qiimo jaban oo ku dhow goobta gaadiidka:** \$45 milyan oo ah amaaahda lagu taageerayo dakhliga canshuurta hoyga ayaa lasoo saari doonaa sanadka 2023 si loo maalgeeliyo guryaha qiimaha jaban ee u dhow xarumaha gaadiidka.
- **Bixinta Caawimaada kirada:** \$20.5 milyan oo loogu talagalay in la siiyo hay'adaha bulshada si ay u bixiyaan kaalmada kirada dadka deegaanka.
- **Taageerida baahiyaha aasaasiga ah:** \$28 milyan oo loogu talagalay in lagu caawiyo shakhsiyadka hela kaalmada kirada ee wakhtiga xaddidan iyo adeegyada ku xiran xasilloonida guryeynta iyo waxyaabaha baahiyaha aasaasiga ah la xariira, sida nadaafada shakhsiyadka iyo gaadiidka.

### Iskaashi ku saabsan Habraacyada gobolka ee la xariira hoy la'aanta

- **Ka dhigista hoy la'aanta mid aad u yar, hal mar ah, iyo mid kooban ayadoo la taageeraayo King County Regional Homelessness Authority:** \$89 milyan oo loogu talagalay in lagu sii wado maalgelinta wax ka qabashada dhibaatooyinka isku dubaridka ah ee hoy la'aanta la xariira ee King County Regional Homelessness Authority.

Su'aalo ma qabtaa? La xariir kcexec@kingcounty.gov.